

▶ Waa maxay Washington Healthplanfinder

CAYMIS HEL. CAYMIS KU SII JIR.

Waa maxay Washington Healthplanfinder?

Washington Health Benefit Exchange (Exchange), ayaa waxaa sannadkii 2012-ka aasaasay golaha sharci-dejinta, wuxuunna dhaqangelinayaa Xeerka Daryeelka La-awoodi-karo ee Gobolka Washington.

The Exchange ayaa maamula *Washington Healthplanfinder*, oo ah mareegto la isugu qoro caymiska Washington Apple Health (Medicaid) ama laga iibsado Qorshaha Caafimaadka U-qalma (QHP) iyo Qorshaha Caafimaadka Ilkaha ee U-qalma (QDP).

The Exchange ayaa iskaashi la leh qabiillada, ururrada bulshada, hay'adaha dowladda, iyo la-hawlgalayaal kale si dadka gobolka Washington loogu xiro ikhtiyaarada caymiska caafimaadka.

Marka aad adeegsato Washington Healthplanfinder, waxaad....

1. Isku-qori kartaa caymiska bilaash ah ama qiimahiisi jaban yahay oo loo marayo Apple Health
2. Iibsan kartaa qorshayaasha QHP iyo QDP waxaadna heli kartaa caawimaad maaliyadeed oo gacan ka geysanaya in laga dhigo caymiska mid si aad ah loo awoodi karo

Goormee ayaan isku qori karaa?

Apple Health ayaa waxaa la heli karaa sannadka oo dhan.

Caymiska qorshayaasha QHP iyo QDP ayaa la heli karaa:

1. Inta lagu guda jiro muddada isqoritaanka furan ee dayirta (1-da Nof. 2020 – 15-ka Jan. 2021, loogu talagalay caynsanaanta 2021)
2. Haddii aad la kulanto dhacdo nololeed u qalanta oo furaysa muddo isqoritaan gaar ah oo ka baxsan muddada isqoritaanka furan. Dhacdada nololeed ee u-qalanta ayaa noqon karta luminta caymiska loo-shaqeeyaha, guur, dhalasho, iwm. Dhacdooyinka nololaha ee u-qalma waa in la soo sheegaa 60 maalmood gudahooda laga soo bilaabo taariikhda dhacdada lala kulmay si loo codsado oo loo xusho qorshaha

Waa immisa kharashka caymiska?

- Washington Apple Health waa mid bilaash ah ama qiimo jaban
- Sicirrada qorshayaasha QHP iyo QDP ayaa kala duwan iyada oo lagu saleynayo da'da, dakhliga reerka iyo degmada. Kaalmo maaliyadeed oo gaar ah ayaa la heli karaa iyada oo loo marayo *Washington Healthplanfinder* si loo vareeyo kharashaadkaaga.

Waa maxay kaalmada maaliyadeed ee la heli karo?

- Canshuur Dhaafka Lacagaha Caymiska ee Joogtada ah oo Heersare ah – kuwan waa canshuur dhaaf dakhliga ku saleysan oo lagu dheelitirayo inta ay le'eg tahay lacagta aad ku bixinayso lacagta joogtada ah ee caymiskaaga.
- Dhimista kharash-wadaagga ah - kuwan waa qiimo dhimis ku saleysan dakhliga oo hoos u dhiga kharashaadka aad jeebkaaga ka bixiso iyada oo la yareynayo lacag-bixinnada adeeg bixiyahaaga marka aad adeegsato adeegyada, sida lacag-bixinnada caymiska ee la wadaago, lacagaha caymiska laga jari karo, iyo caymiska-la-wadaago.

Hel Caawimaad Qof Ahaan Ah

WAPlanfinder

MACLUUMAADKA CAYMISKA OO DEGDEG AH
ADEEGSO APP-KA TELEFOONKA GACANTA SI AAD U HESHO
CAAWIMAAD QOF AHAAN AH OO KUU DHOW




wahealthplanfinder.org

1-855-WAFINDER

1-855-923-4633

Caawimaad lagu bixiyo barta internet-ka, qof ahaan (marka la heli karo), iyo telefoonka ayaa la heli karaa.

La xiriir Ururka Hagaha Hoggaanka ah ee degaankaaga si aad ula xiriirto



Better Health Together
 Telefoonka: 1-509-381-5566
 Telefoonka: 1-509-444-8200
 limaylka:
 bhtnavigatorstaff@BetterHealthTogether.org

CHOICE Regional Health Network
 Telefoonka: 1-360-539-7576
 limaylka: navigator@crhn.org

Confluence Health/Wenatchee Valley Hospital
 Telefoonka: 1-509-433-3383
 limaylka: SM_CH_Lead_Org@ConfluenceHealth.org

Peninsula Community Health Services
 Telefoonka: 1-360-377-3776
 limaylka: eligibility@pchweb.org

Public Health Seattle-King County
 Telefoonka: 1-800-756-5437
 limaylka: CHAP@kingcounty.gov

SeaMar Community Health Clinics
 Telefoonka: 1-855-289-4503
 limaylka: seamaripa@seamarchc.org

Tri-Cities Community Health
 Telefoonka: 1-509-543-1952
 limaylka: EnrollmentHBE@mytcch.org

Yakima Neighborhood Health Services
 Telefoonka: 1-509-853-2377
 limaylka: navigators@ynhs.org

Isqoritaanka Furan ee loogu talagalay caymiska 2021 waa 1-da Nofembar – 15-ka Janaayo

Caawimaadda ayaa la heli karaa fiidadka iyo maalmaha fasaxa ee toddobaadka

wahealthplanfinder.org 1-855-WAFINDER 1-855-923-4633